



U.S. Department of Justice Community Relations Service
(Adeegga Xariirka Bulshada ee Waaxda Cadaalada Maraykanka)

Ka caawinta Bulshada Xalinta Rabshadaha ayagoo Adeegysanaaya Dhex-dhexaadinta

Community Relations Service (CRS, Adeegga Xariirka Bulshada) United States Department of Justice (Waaxda Cadaalada Maraykanka) waxay bixinaysaa adeegyada dhex-dhexaadinta si looga caawiyo bulshooyinka inay xaliyaan rabshadaha iyo khilaafaadka ku salaysan isirka, midabka, asalka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, ama naafada.

Dhex-dhexaadinta CRS waa hanaan nidaamsan oo rasmi ah kaasoo dhinacyada dagaalku u dhexeeyo ku kulmayaan si ay u aqoonsadaan ciladaha saamaynta ku leh bulshooyinka deegaanka ayna u abuuraa heshiisyo xal looga gaaraayo arimahaan. Dhex-dhexaadintu waa hanaan xal loogu helaayo isku dhaca kaasoo loogu talagalay inuu ka taageero bulshooyinka maxaliga ah abuurista xalal ku haboon ayaga, ayadoo hadana la siinaayo qaab kale oo lagu yaraynaayo rabshada.

Guudmarka Adeegyada Dhex-dhexaadinta ▼



Getty Images

Tusaaleyaasha Adeegyada Dhex-dhexaadinta ▼

Ka caawinta maamuleyaasha dugsiyada, waalidiinta, iyo ardayda gaarista heshiis ku aadan sida loo xaliyo isku dhacyada ku salaysan isirka ee ka dhaca dugsiya

La shaqaynta wakaaladaha sharci fulinta iyo kooxaha bulshada si loo abuur qorsheyaal kor loogu qaadaayo xariirada bulshada iyo booliiska

Fududaynta heshiisyada u dhexeeya sharci fulinta, kooxaha diinta, iyo ururada xaquuqda aadanaha si loo xaliyo dhacdooyinka danbiyada nacaybka iyo eexda saamaynaaya bulshada maxaliga ah

Ka qaybgal Ikhtiyaari ah Dhex-dhexaadinta CRS waa hanaan ikhtiyaari ah kaasoo dhinacyadu iskudayayaan inay xal ka gaaraan arimaha ayagoo adeegsanaaya wada hadal iyo heshiisiin.

Heshiisyada La dhex-dhexaadiyay. Heshiisyada la abuuray inta lagu jiro kulanka dhex-dhexaadinta ayaa lagu xifdin karaa dukumiinti qoraal ah oo ay saxiixayaan dhinacyada heshiiska uuna goob-joog ka noqonaayo dhex-dhexaadiyuhu. Dukumiintiyadaan aan qasabka ahayn in la fuliyo ee ku salaysan niyad samida ayaa badanaa loogu yeeraa heshiiska isfahanka ama heshiis horudhac ah.

Sirta. Dhex-dhexaadiyaasha CRS ayaa ilaaliya sirta ka qaybgaleyaasha oo qayb ka ah hanaanka lamana wadaagaan xogta ay ogaadaan inta lagu jiro kulannada dhex-dhexaadinta ah cid ka baxsan kulanka, ayna ku jiraan saxaafada, ururada, ama shaqsiyaadka.

Sinaanta. Inta lagu jiro hanaanka dhex-dhexaadinta, CRS uma doodo cid gaar ah, mana difaacdo arin gaar ah. Taas badalkeed, dhex-dhexaadiyaasha ayaa diirada saaraaya bixinta hanaan cadaalad ah oon eex lahayn kaasoo ka caawinaaya dhinacyada inay gaaraan heshiisyo.

Xog ku saabsan CRS ▼


Wuxuu adeegu ku dhisan yahay Title X ee Sharciga Xaquuqda Aadanaha oo soo baxay 1964 iyo Sharciga Kahortaga Danbiyada Nacaybka Ku salaysan ee Matthew Shepard iyo James Byrd, Jr., oo soo baxay 2009, CRS ayaa ah adeegga "nabad ilaalinta Ameerika" ee bulshooyinka waajahaaya qalalaasaha ama isku dhacyada ku salaysan kala duwanaanshaha isirka, midabka, asalka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, iyo naafada. Adeegyada CRS ayaa diirada saaraaya kor u qaadista awooda bulshooyinka deegaanku u leeyihiin inay si madax banaan oo wada jir ah uga hortagaan xalna uga gaaraan dagaallada mustaqbalka ayagoo adeegsanaaya xalinta dhibaata, aqoon dheeraad ah, iyo wada hadal wanaagsan.

Adeegyada iyo Barnaamijada CRS ▼

CRS wuxuu barnaamijyo taxaneayaal ah siiyaa bulshooyinka waajahaaya rabshadaha, oo ah qaab lagu gaaraayo isfahan, kor loogu qaadaayo wada shaqaynta, loogana hortagaayo khilaafaad yimaada mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa dhex-dhexaadiyaal, fududeeyaal, tababeryaal, iyo la taliyaal xirfad leh kuwaasoo khibrad u leh isku keenista xubnaha bulshada si kor loogu qaado awoodooda xal u helida rabshadaha jira iyo kahortaga rabshadaha dhici kara mustaqbalka.

Meesha aan ka Shaqayno ▼

- New England
- Waqooyi-bari
- Atlantiga-Dhexe
- Koonfur-bari
- Galbeedka-dhexe
- Koonfur-galbeed
- Dhexda
- Buuralayda
- Galbeedka
- Waqooyi-galbeed
- Saraakiisha Goobta Shaqada
- Saraakiisha Gobalka
- Xafiiska CRS ee Goobaha Shaqada



Hel adeegeena, nagu xirnoow ▼

www.justice.gov/crs

www.justice.gov/hatecrimes



Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkaan ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xariir xafiiska CRS ee deegaankaaga:

<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>